LONDON FIRE BRIGADE

Hage amni dab qabsada guryo

Somali

KA HORTAGGA DAB KACAY

Ka hortagga dab ka kacay gurigaaga:

- Weligaa kursi adigoo ku fadhiya ha cabin sigaar, hadday kula tahay inaad ku dul hurdayso, weligaa sariirta dusheeda ha ku cabin sigaar.
- Ha dayacin sigaar, baabka sigaarka lagu cabo ama shumaca lashito.
- Adeegso ashtarii qoto leh si aanu sigaarku uga dhicin, isla markaana haku ridin sigaarka soo hara dambiil qashinka lagu rido oo ka samaysan warqad.
- Ka fogee carruurta tarakha iyo laytarka sigaarka lagu shido.
- Fadhiiso saddax talaabo meel u jirta kuleyliyaha guriga. Weligaa dharka iyo alaabada sharaxaada ha u dhawayn kuleyliye guri.
- Aalado farabadan ha ku rakibin soketyada korontada.

XUSUUSO

Sariirta ha ku cabin sigaar.

Meel ammaana dhig tarakhyda.

Meel u dhow dab baxaya ha fadhiisan.

Aalado farabadan haku rakibin soketyada korontada.

Iska ilaalin burbur iyo dhaawac kaa soo gaara dab ka kacay guriga:

- Samayso alaarmi dab, ku siinaya waqti dheeri ah oo adiga iyo dadka kale aad si ammaana ugu baxsataan.
- Alaarmi qaac waa raqiis si sahlan lagu rakibo. Hubi inuu yahay mid wacan oo la socda Heerarka Britain ama u dhigma heerarka caalamiga. Waxaa si fudud looga helaa dukaamada DIY iyo kuwa qalabyada lagu iibiyo.
- Haddaad dhibaato ku qabto, ururro xaafadeed ee iskood wax u qabta ama ciidanka dab-demiska ayaa suurogala inay alaarmi kuu rakibaan.
- Qaar kamida alaarmiga sigaarka oo loogu talogalay dadka maqalkoodu liito wuxuu muujiyaa suuf ruxmaya ama nal falaasha oo casaana. Suufka ruxmaya wuxuu si gooniya faa'iido ugu leeyahay dadka dhago iyo indho aan qabin.

XUSUUSO

Rakibo alaaramyo sigaar.

Iska hubo inuu alaarmigu yahay mid heerkiisu wacan yahay.

WAQTIGA JIIFKA SARIIRTA

Kahor inta aan la seexan:

- Hubi in makiinada cuntada karisa iyo kuleyliyaha guriga dansan yihin.
- Xakamee dabka holcaya oo diyaari wax lagu ilaaliyo dabka.
- Dami oo korontada ka siib dhammaan aaladaha ku shaqeeya marka laga reebo kuwa loo baahan tahay, sida telefishinka iyo qaboojiyaha.
- Xaqiiji inay telefoonadaadu shaqeynayaan.
- Faaruji ashtariiyada, hubi inaanu haraa kulul ku jirin.
- Albaabada oo dhan xidh, maadaama arrintan keeneyso inaanu dabku faafin.
- Goor walba dami duufeega korontada ah markaad sariirta gasho isku marna weligaa ha adeegsan kubeerto koronto ah iyo dhalo biyaha kulul lagu shubto.
- Kubeertada korontada waa inuu hubiyaa qof khibrad leh saddax sano kasta.

XUSUUSO

Hubi in wax kasta ammaan yihiin kahor inta aadan gelin sariirta.

Demi kubeertooyinka korontada ah goorta aad sariirta gasho.

Si joogto ah u baar kubeertooyinka korontada ku shaqeeya.

AMMAANKA JIKADA WAX LAGU KARSADO

Ka hortag inuu dab ka bilowdo jikada:

- Weligaa haka buuxin weelka wax lagu kariyo in ka badan saddax meelood meel oo ah subag ama saliid.
- Weligaa weelka haka tegin inta makiinadu shidan tahay.
- Cuntada cayriin qalaji intaadan ku ridin saliida kulul – cuntada qoyan waxay keeni doontaa in saliida firdhato waana suurogal inay ka gudubto geesaha weelka wax lagu karinayo.

Haddii weelka wax lagu karinayo uu qabsado dab:

- Ha dhaqaajin ama biyo ha ku dul shubin.
- Makiinada wax karinaysa dami hadday tahay suurogal.
- Haddaad shakiso, ka bax qolka, albaabka xidh, qaylo dhaan u dir dadka kale una wac ciidanka dab damiska.

XUSUUSO

Weelka wax lagu kariyo ama lagu dubo haka buuxin saliida.

Haddii saliidu holacdo – korontada ka demi.

KA BAXSASHADA DAB KACAY

Qorsheynta sidii aad ku baxsan lahayd:

- Waqti-yar kelya oo aad ku baxsato ayaad haysataa, markaas qorshee wadadii aad ku baxsan lahayd intii aad sugi lahayd inuu dab ka koco guriga.
- Ka fakar waddo kale ood ku baxsato haddii middii ahayd caadiga ah xirmato.
- Waddooyinka baxsashada mar walba ka dhig kuwo aan alaabo ku gudbanayn.
- U sheeg qof walboo guriga deggan halka furaha alaabada iyo daaqado yaaliin.
- Ku xafid dokumintiyo muhiima sanduuq-bira oo aanu dabku karin.

Ka baxsashada dab kacay:

- Dab wuxuu kici karaa mar aadan filanayn, inta badan habeenimada.
- Haddii alaarmiga sigaarka qayliyo inta aad jiifto, waxba ha baarin. Ka kixi qof walba, dibaddana ugu saar sida ugu dhaqsi badan. Marnaba ha hubsan inuu ahaa dhawaaq alaarmi oo qalad ah iyo in kale.
- Wac telefoonka 999 haddaad waqti u hayso.
- Albaabo xidhan ka taabo dhanka alwaaxa ah. Haddii kuleyl jiro ha furin albaabka sababtoo ah macnaheedu waa dhankiisa kale ayaa gubanaya.
- Qaaca iyo uumigu sidoo kale wax way dili karaan, fariiso adigoo u dhawaanaya sagxadda sidii suurogala halkaa hawada aad ayay uga nadiifsanaan doontaa dhanka sare.
- Ha car-cararin, is-deji qof walbana sida ugu dhaqsi badan ee suurogala u saar.
- Ha u joogsan inaad qaadato waxyaabo qiimo leh.
- Haddii wadadii aad ku baxsan lahayd dab xidho waxaa suurowda inay amni kuu tahay inaad sugto inta ciidanka dab-demisku ka imaanayaan. Albaabka xidh oo adeegso taawello iyo marooyin si aad u baloogto daloolada qaaca soo gudbinaya. Daaqad istaag, oo qaylo dhaan samee oo sug in lagu badbaadiyo.

XUSUUSO

Samee qorshe baxsasho.

Furayaasha daaqad waxaad ag dhigtaa dariishadaha.

Qof walba dibadda u saar si degdega sidii suurogala.

Wac telefoonka 999.

Hoos guurguuro qaaca iyo uumiga.

Guffee daloolada albaabka haddaad dab ku go'doontay.

KA BAXSASHADA DABAB KA KACA GURYAHA FALAATYADA IYO MAYSONEETYADA

Haddaad degan tahay guri ah falaat ama maysoneet fadlan raac talo-bixintan dheeriga ah:

- Falaatyo iyo maysoneetyo waxaa loogu dhisay inay ku siiyaan wax xoogaa xafidaada hadduu dab ka koco. Derbiyada, sagxadda iyo albaabada way iska caabin doonaan dabka muddo cabbaara. Haddii dab ka jiro meel kale oo ka mid ah dhismaha sida caadiga ah waxaad badbaado ku qabtaa inaad falaatkaada ku jirto marka laga reebo haddii kulayl ama qaac ku asiibaan.
- Hadduu dab ka koco falaatkaaga, ka baxso daarta soona xidh albaabka falaatkaaga.
- Hadduu jiro qaac faro badan, ku guurguuro sagxadda halkaas oo uu qaacu ka yaraan doona xagga sare.
- Haddii ay daarta aad deggan tahay wiish leedahay, ha adeegsan wiishka hadduu dab koco, bedelkeeda adeegso jaranjrada.
- Ka wac lambarka 999 telefoon kasta. U sheeg cinwaanka raacsii lambarka falaatkaaga, una sheeg qaybta uu dabku ka kacay.

XUSUUSO

Jaranjarrooyinka, goobaha la maro iyo baalkoonada ee bulshada waa in laga ilaaliyaa dhammaan aaladaha gubta sida gaariga ilmaha lagu riixo, baaskiilada.

Alaabada bulshadu iska tuurto, sida khashinka waa in loo geeyaa goobaha khashinka ee ku habboon si dhaqsi leh isla markaana aan la dhigin goobaha bulshada.

Qof kasta wuu noqon karaa Jambiiyoon amni dab kacay

KEEP YOUR COMMUNITY SAFE & SOUND

KKADHIG BULSHADAADA MID AMAANA OO CAAFIMAAD QABTA

www.london-fire.gov.uk